## SUURAT AL-MUDHAFFIFIN:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Wuxuu halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya***

***2. Waa kuwa markay miisina oofsada ( dhammaystirta )***

***3. Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya***

***4. Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin***

***5. Maalin wayn darteed ( Qiyaamada )***

***6. Maalinta dadku u istaagi Eebaha Caalamka***

***7. Saas ma aha ee camalka kuwa xun wuxuu ku qoranyahay Sijiin***

***8. Ma taqaannaa Sijiin***

***9. Waa Kitaab calaamaysan***

***10. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa beeniya ( Xaqa )***

***11. Ee ah kuwa beeniya Maalinta Abaal marinta***

***12. Waxaana beeniya xaqa mid xad gudba oo dambiila ah***

***13. Marka Quraanka lagu akhriyana yidhaahda waa warkii dadkii hore***

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Ganacsiga iyo wax kala gadashadu waa xalaal bannaan haddii jidkeeda la mariyo, waana xaaraan xun haddii la leexiyo oo dadka lagu boobo, ruuxiise Eebe ka yaabi iyo hor istaaggiisa Maalinta Qiyaame waa inuu iska jiraa ganacsiga xun, ileen Eebe caddibaad daran yuu ugu gooddiyay kuwaas . Nabiguna wuxuu yidhi “Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee”: Maalinta dadku u istaagi waynanka Eebaha Caalamka Maalinta Qiyaame, dhididkuna dadku xakamayn ilaa uu ka gaadho dhagahooda.

Waxaa wariyay Imaamu Axmad binu Xambal

***14. Saas ma aha ee waxaa fuulay qalbigooda ( mirdhiyay ) waxay kasban jireen oo dambi ah***

***15. Waxaa sugan in Eebahooda Maalintaas ( Qiyaame ) laga xijaabi***

***16. Markaasna ay gali Jaxiimo***

***17. Waxaana loo odhan tani waa Naartaad ku beeninayseen Adduunka***

***18. Saas xaalku ma aha ee Kitaabka iyo Camalka dadka wanaagsan wuxuu ku qoranyahay Cilliyiin***

***19. Cilliyiin ma taqaannaa***

***20. Waa Kitaab la calaameeyay ( oo dadka fiican magaciisa lagu qoro )***

***21. Waxaana gacanta ku haya Malaa'ig Eebe u dhaw***

***22. Kuwa wanaagsan waxay gali Naciima ( Janno )***

***23. ( Maalinta Qiyaamana ) Sariira yay ku dangiigsanaan oy wax ka daawan***

***24. Wajigooda yaanad ka garan nicmada***

***25. Waxaana laga waraabin cabbid la dhawray ( oo macaan )***

***26. Waxaana lagu khatimaa Miski iyo udgoon, ee arrintaas ha u tartameen tartamayaashu***

***27. Waxaana lagu dheehi cabbitaan sare***

***28. Waa il ay ka cabbaan kuwa Eebe u dhaw***

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***

Dambigu wuxuu halleeyaa quluubta dadka, wuxuuna sabab u noqdaa Eebe oo iska xijaaba ruuxaas, sidaa oo kale wuxuu u hoggaamiyaa dadka Naarta iyo caddibaad. Dadkase Eeba addeeca waxay ku raaxaysan Janno iyo cabbid macaan oo xalaal ah iyo aragga Eebahood, waana xaal loo

*29. Kuwii dambaabay ( gaaloobay ) waxay ahaayeen kuwa ku qosla kuwii xaqa rumeeyay*

*30. Haday maraanna way xaqirijireen*

*31. Markay guryahoodi u noqdaanna ( gaalaadu ) waxay noqon jireen iyagoo isla wayn ( oo raaxaysan )*

*32. Markay arkaan Mu'miniintana waxay dhahaan kuwaasi waa dhunsan yihiin*

*33. Loomana dirin inay ilaaliyaan Mu'miniinta*

*34. Maalinta ( Qiyaame ) kuwa rumeeyay xaqa waxay ku qosli gaalada*

*35. Sariiro korkooda yayna wax ka daawan*

*36. Miyaan laga abaalmarinnin gaalada waxay falayeen ( waa laga abaalmariyay )*

Qur'aan 83: 1-36

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***
Isla waynida iyo kibirka iyo dadka xaqa rumeeyay oo la xaqiro lana liido waxay dhaxalsiin dulli caddibaad Aakhiro iyo Adduunba, waana shaqada iyo falka xunxun een caqliga lahayn. Eeg waxay ku dambeeyeen Ree-Caad, Fircoon, Qoomkii Nabi Nuux, Qureeshtii ree Makaad iyo cid kasta oo isla waynaatay xadna-gudubtay, saa darteed waa in laga digtoonaado falalkaas oo kale, wanaaggana la raaco, illeen waa layska abaal-marin wixii la falaye.